



## Ka baro qaar ka mid ah noocyada qoob-ka-ciyaarka ardeyda Dugsiga Sare ee Jefferson

Haddii ardeygaaga wax ka barta dugsiga hoose ama dugsiga dhexe uu yahay arday ku wanaagsan qoob-ka-ciyaarka, markaasi waxa ay fursad u helayaan in ay tababar ka helaan barnaamijyada ugu sareeya ee qoob-ka-ciyaarka ee gobolka oo ah Qoob-ka-ciyaarayaasha Dugsiga Sare ee Jefferson. Waxaa caruurta loo furay goobta la yiraa Jr. JD Dance Clinic oo u furan dhammaan ilmaha leh xirdadaha heerkooda qoob-ka-ciyaarku kala duwan yahay, laga bilaabo Xannaanada ilaa fasalka 8aad.

Waalidiinta xiiseynayaa waa in ay iska diiwaangaliyan online halkan:

[jeffersondancers.org/clinic](http://jeffersondancers.org/clinic). Waxa kale oo jira in goobtaasi lagugu diiwaangalinaya maalin ka hor tababarka ugu horeeya saacadaha u dhaxeeya 5:30-6 fiidkii, maalinta Tallaadada, bishan Sebtambar 12keeda; tababarku wuxuu soconayaa inta u dhaxaysa 6-7:30 habeenkii. Tababarka labaad wuxuu dhici doonaa maalinta Khamiista, bisha Sebtamber tahay 14ka, saacadaha u dhaxeeya 6- 7:30 habeenimo. Labada tababarba waxay ka dhacayaan Dugsiga Sare ee Jefferson, cinwaankiisuna yahay 5210 N. Kerby Avenue.

Qoob-ka-ciyaarayaasha Jr. JD waxa ay baran doonaan qoob-ka-ciyaar ay ku soo bandhigi doonaan marka kubada gacanta ay wada ciyari doonaan kooxaha Dugsiga Sare Jefferson iyo Dugsiga Sare ee Franklin marka nuska hore ee ciyartu dhammaado ee lagu jiro waqtiga nasashada maalinta Jimcaha , bishan Sebtamberna tahay 15ka, saacadu marka ay tahay 7:30 habeenimo.

Qiimaha qofka hore isku sii diiwaangaliyaa waa \$25 , haddii kale \$30 doolar qofka goobta iska diiwaangalinaya. Kharashka qiimaha waxa ku jira shaati ay ku qoran tahay magaca kooxda.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan waxaad wacdaa waalidka JD BeverLee Tuyub telefoonka (503) 349-5015 ama e-mail: [clinic@jeffersondancers.org](mailto:clinic@jeffersondancers.org)

Haddii aad rabto in aad wax badan ka ogaato Qoob-ka-ciyaarayaasha Jefferson, waxaad booqataa shabakadan <http://jeffersondancers.org/>.